

Qoysaska Qaaliga ah ee Guddiga Dugsiga Degmada Hamilton-Wentworth,,

Ku soo dhawow sanad dugsiyedka cusub! Waad ku mahadsantahay ku soo biiridaada HWDSB sida aan u caawino dhamaan ardayda inay gaaraan filashadooda buuxdo.

Waxaa laga yaabaa in aad la socotid in ay Guddiga Dugsiga Ontario fullinayaan manhajka la muraajaceeyay ee Caafimaadka iyo Waxbarashada Jirka Wasaarada Waxbarashada (HPE) sanadkaan. Manhajka la muraajiceeyay wuxuu baddalayaa noocii 1998.

Manhajka la muraajiceeyay wuxuu diirada saarayaa aasaaska ku noolaanshaha caafimaad iyo nolol firfircooni. Tani waxaa ku jira baridda horumarka aadanaha iyo caafimaadka galmada. Waan ognahay tani waxay noqon kartaa mowduuc xasaasi ah, waxaan kale oo aan ognahay in ay arintaani khuseyso waalidka Wuxuu rabnaa in aan la wadaagnoqoysaska sida ay u baran karaan wax badan ayna u waydiin karaan su'aalo badan.

Baridda Horumarka Aadanaha iyo caafimaadka galmaadu ma ahan wax ku cusub Guddiga Dugsiga Ontario. Manhajka la muraajaceeyay HPE wuxuu ka tarjumayaa xaqiqooyinka ay maanta la kulmaan ardayda oo la xariira caafimaadkooda, badbaadadooda iyo fayo qabkooda. Waxay wadataa dukumiintiyo cusub oo la xiriira arimo muhiim ah - xiriirada caafimaadka, ogolaanshaha iyo caafimaadka maskaxda, amniga onleenka iyo halisaha galmada - iyo loo dhammaan badan ee kala duwanaanshaha shacabka Ontario.

HWDSB waxay u diyaarinaysaa shaqaaleheeda in ay gaarsiyyaan manhaj la muraajiceeyay, oo leh fahamka ee in tani ay noqon karto mowduuc xasiisa ku ah qoysaska qaarkood. Wuxuu doonaynaa in aan hubino in gaarsiintena ee manhajka la muraajiceeyay waxaa lagu sameynayaa wado si aad ah looga fakeray, iyo fahamka bulshada waalidka.

Waxaan rabnaa in waaladiinta si fiican ula socdaan waxa carruurtooda ay ka baranayaan. Sababtaan awgeed, waxaan qabanaynaa saddex kulan oo warbixin ah ee Manhajka la muraajiceeyay ee Caafimaadka iyo wax barashada Jirka. Tani waxay u tahay waaladiinta in ay waydiyyaan wixii su'aalo ah,, in ay sheegaan su'aalahooda iyo oo ay wax badan ka bartaan manhajka.

Fadlan xurnimo dareen oo oo aad uga soo qeb gashid kulamada warbixinta ee hoose:

Arbacada, Nofeembar 4, Dugsiga Hoose Dr. Davey 99 Ferguson Ave. N., Hamilton, Ka bilow 3:30 – 5 pm.

Khamiista, Nofeembar 5, Dugsiga Sare Saltfleet 108 Highland Rd. W., Stoney Creek ka bilow 7 – 9pm.

Talaadada, Nofeembar 10. Dugsiga Sare Sir Allan MacNab 145 Magnolia Dr., Hamilton ka bilow 7 – 9pm.

Waan ognahay in ay waaladiinta qaarkood rabayaan in ay bartaan wax badan ee manhajka la muraajiceeyay ee HPE. Wasaaradda Waxbarashada waxay ku diyaarisay luuqado kala duwan dukumiintiyada loo diyaariyay waaladiinta. Qaar ka mid ah illaha ugu muhiimsan ee la bixiyay waxaa ku jira:

- Koobiyo ah dugsiga hoose iyo dugsiga sare iyo manhajka Waxbarashada jirka.
- Tusaha waalidka ee Caafimaadka iyo Waxbarashada Jirka.
- Dulmarka Fasal ba Fasal ee waaladiinta ee Caafimaadka iyo Manhajka Waxbarashada Jirka.
- Xaqiqooyinka degdega ee Caafimaadka iyo Waxbarashada Jirka ee waaladiinta.



Manny Figueiredo
Agaasimaha Waxbarashada
TEL: 905.527.5092 EXT: 2297
FAX: 905.521.2544

Kuwaan waa onleenka ee <http://www.edu.gov.on.ca/eng/curriculum/elementary/health.html> (ee diirad saarida dugsiga hoose) iyo <http://www.edu.gov.on.ca/eng/curriculum/secondary/health.html> (ee diirid saarida dugsiga sare).

Intaas waxaa dheer, waaladiinta su'aalaha qabo waxay ka helayaan jawaabo Su'aalaha Inta badan Lisweydiyo (FAQ) qaybta bogga websaydka HWDSB ee loogu tala galay HPE. Tani waa <http://www.hwdsb.on.ca/elementary/programs/healthphys-ed-curriculum/>.

Dhamaan dugsiyada HWDSB waxay ugu dirayaan waaladiinta guriga waraaqaha heerka fasalka ugu yaraan hal bil ka hor inta aysan macalimiinta dhigin caafimaadka galmaada ee manhajka.

Waaladiinta ka qabo walaacyo casharada fasalka ama barashada ku soo dhawow si aad ugala hadashid kuwaan macalinka ama maamulaha dugsiga. Shaqaalaheenu waxay ku dadaalayaan inay helaan xalal iyaga oo u raacaya dacwad ba dacwad.

Waan uga mahadcelinay waaladiinteenaa talladooda joogtada ah, iyo oo ah danaha qof walba ee mowduucaan muhiimka ah.

A handwritten signature in black ink, appearing to read 'Manny Figueiredo'.

Manny Figueiredo
Agaasimaha Waxbarashada